**War** saxaafadeed

# Taageero dheeraad oo waalidiinta iyo ardayda ah

Oktoobar 3, 2025

Ka hor inta aysan dhicin shaqo-joojinta macallimiinta, dowladda Alberta waxay soo bandhigeysaa taageerooyin dheeraad ah oo loogu talagalay qoysaska iyo ardayda.

Dowladda Alberta waxay garawsan tahay hubanti la'aanta ay keeni karto shaqo-joojinta macallimiintu. Si ay u taageerto qoysaska iyo ardayda xilligan adag, dowladda Alberta waxay bilaabeysaa taageerooyin dheeraad ah.

Ka sokow taageeradan dheeraadka ah, dowladda Alberta waxay sidoo kale bixineysaa qalab waxbarasho oo bilaash ah oo waalidiintu ka faa'iideysan karaan si ay uga caawiyaan ilmahooda waxbarashada inta dugsiyadu xidhan yihiin. Waxaa sidoo kale la siinayaa taageero dhaqaale oo gaaraysa ilaa $150 toddobaadkiiba arday kasta, si qoysaska looga caawiyo helista adeegyada daryeelka carruurta iyo taageerada waxbarashada ee ilmahooda.

Ka hor inta aysan dhicin shaqo-joojinta macallimiinta, dowladda Alberta waxay soo bandhigeysaa taageerooyin dheeraad ah oo loogu talagalay qoysaska iyo ardayda.

Dowladda Alberta waxay garawsan tahay hubanti la'aanta ay keeni karto shaqo-joojinta macallimiintu. Si ay u taageerto qoysaska iyo ardayda xilligan adag, dowladda Alberta waxay bilaabeysaa taageerooyin dheeraad ah.

Ka sokow taageeradan dheeraadka ah, dowladda Alberta waxay sidoo kale bixineysaa qalab waxbarasho oo bilaash ah oo waalidiintu ka faa'iideysan karaan si ay uga caawiyaan ilmahooda waxbarashada inta dugsiyadu xidhan yihiin. Waxaa sidoo kale la siinayaa taageero dhaqaale oo gaaraysa ilaa $150 toddobaadkiiba arday kasta, si qoysaska looga caawiyo helista adeegyada daryeelka carruurta iyo taageerada waxbarashada ee ilmahooda.

## Kaalmada Daryeelka Carruurta

Si loo fududeeyo culayska dhaqaale ee qoysaska u baahan daryeel carruur dheeraad ah inta uu socdo shaqo-joojinta macallimiinta, dowladda Alberta waxay kordhin doontaa heerarka maalgelinta ee Oktoobar ee carruurta xaqa u leh ee dhigata fasallada 1 ilaa 6 oo si buuxda uga qayb qaadanaya barnaamijyada daryeelka carruurta ee ka baxsan iskuulka.

Kordhinta ku meel gaadhka ah ee maalgelintu waxay dhaqan geli doontaa kadib shan maalmood oo xiriir ah oo shaqo-joojin ah waxayna quseyn doontaa dhammaan bisha Oktoobar. Heerka maalgelinta ayaa loo kordhin doonaa ugu badnaan $644 si loo waafajiyo heerarka maalgelinta ee la bixiyo xilliyada xagaaga marka carruurtu u baahan yihiin daryeel buuxa.

**Waxbarashada Fogaan Arag**

Si ardayda loogu sii wado helitaanka waxbarashada iyo dabacsanaan badan, dowladda Alberta waxay si ku-meel-gaar ah u qaadaysaa xaddidaadda 10-credit ee sannadkii ee waxbarashada fogaan aragga. Tani waxay u oggolaanaysaa ardayda fasallada 10 ilaa 12 inay sii wataan kasbashada credits inta lagu jiro shaqo-joojinta haddii ay rabaan. Ardaydu waxay sidoo kale iska diiwaan gelin karaan barnaamijyada waxbarashada fogaan aragga ee ay bixiyaan iskuullada madaxa bannaan wakhti kasta inta shaqo joojintu socoto.

**Waxbarashada Guriga**

Waalidiintu waxay sidoo kale dooran karaan inay ilmahooda ku qoraan barnaamijka waxbarashada guriga ee ay maamusho iskuul madax bannaan. Haddii qoys uu sidaas doorto, labada qoyska iyo iskuulka madaxa bannaan ee kormeera ayaa xaq u yeelan doona ilaa 50% deeqda waxbarashada guriga, ugu badnaan $450.50 carruurta kasta.

“In kasta oo aan ka xumahay go’aanka ururka macallimiinta ee ATA ee ah inay shaqo-joojiyaan, haddana waxaan diiradda saaraynaa waxa ugu muhiimsan: carruurteena iyo waxbarashadooda. Taageerada dheeraadka ah ee aan soo bandhigayno waxay caawin doontaa qoysaska u baahan daryeel carruur, waxayna ardayda siin doontaa fursado waxbarasho oo bulshadooda dhexdeeda ah iyo doorashooyin badan oo ku saabsan sida iyo halka ay wax ku bartaan.”
Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta

**Barnaamijyada Qoysaska**

Si loo siiyo fursado dheeraad ah oo waxbarasho ah, goobaha taariikhiga ah iyo matxafyada gobolka Alberta waxay bixiyeen gelitaan bilaash ah dhammaan dhalinyarada iyo carruurta da’doodu ka yar tahay 18 sano inta uu socdo shaqo joojinta macallimiinta.
Goobaha bixiya gelitaanka bilaashka ah waxaa ka mid ah:

- Frank Slide Interpretive Centre, Crowsnest Pass
- Head-Smashed-In-Buffalo Jump, Fort Macleod
- Oil Sands Discovery Centre, Fort McMurray
- Remington Carriage Museum, Cardston
- Reynolds Museum, Wetaskiwin
- Royal Alberta Museum, Edmonton
- Royal Tyrrell Museum, Drumheller

Waalidiinta iyo xubnaha qoyska weli waxaa laga rabaa inay bixiyaan khidmadaha gelitaanka. Martida ka yar 14 sano waa in ay la socdaan qof weyn. Matxafyaduna waxay sidoo kale kordhin doonaan saacadaha ay shaqeeyaan. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay booqdaan website ka matxaf kasta oo ka qayb qaadanaya si ay u helaan faahfaahinta saacadaha iyo barnaamijyada la bixiyo.

"Xilligan hubanti la'aanta ah, waxaan ka go'an tahay inaan taageerno qoysaska reer Alberta. Annagoo siinayna carruurta reer Alberta ee da'yar gelitaan bilaash ah matxafyada iyo goobaha taariikhiga ah ee gobolka, waxaan ka caawinaynaa waalidiinta inay maareeyaan carqaladaha isla markaana carruurta siinaynaa fursado waxbarasho oo qiimo leh."

Tanya Fir, Wasiirka Farshaxanka, Dhaqanka iyo Xaaladda Haweenka

Haddii shaqo-joojin dhacdo, dowladda Alberta sidoo kale waxay baareysaa siyaabo lagu kordhin karo taageerada qoysaska carruurta leh baahiyo adag oo gaar ah.

**Xaqiiqooyin degdeg ah**

- Ardayda doorata waxbarashada fogaan aragga (distance education) iyagoo aan ahayn ku qoran iskuulkooda ugu weyn waxay sii ahaanayaan kuwo diiwaangashan iskuulkooda deegaanka halka ay ka helayaan credits dheeraad ah hay'ad waxbarasho kale.
- Haddii qoysasku doortaan inay carruurtooda ku qoraan barnaamij waxbarashada guriga inta uu socdo shaqo joojinta macallimiinta, carruurtaasi laguma sii diiwaan geli doono iskuulkooda dadweynaha, kan gaar ah ama kan Faransiiska.
  - Haddii ay joojiyaan waxbarashada guriga, laguma dammaanad qaadayo inay ku laaban doonaan iskuulkoodii hore ee ay hore u dhiganayeen.
- Hay'adaha waxbarashadu waa inay aqbalaan ardayda deegaanka dib u soo laabanaysa fasallada 1 – 12 oo waa inay ku meeleeyaan iskuul ka tirsan hay'adda waxbarashadaas.
- Barnaamijka lacagta waalidka ee Alberta (Parent Payment Program) wuxuu siin doonaa waalidiinta ama masuuliyiinta xaqa u leh $30 maalintii, ama $150 toddobaadkii arday kasta inta shaqo joojintu socoto.
- Waalidiintu waxay heli karaan qalab waxbarasho oo bilaash ah si ay uga caawiyaan ilmahooda waxbarashada inta shaqo-joojintu socoto.

**Macluumaad la xiriira**

- Taageerada waalidiinta inta iskuulladu xiran yihiin (Parent supports during school closure)
- Kaalmada daryeelka carruurta (Child care subsidy)
- Raadinta adeegyada daryeelka carruurta (Child care lookup)
- Goobaha taariikhiga ah, matxafyada iyo kaydadka (Historic sites, museums and archives)
- Qalabka waalidka ee la soo habeeyey (Curated parent toolkit)
- Waxbarashada khadka tooska ah (Online learning)
- Waxbarashada guriga (Home education)

Alberta

**War** saxaafadeed

**Warar la xiriira**

- Taageeridda waalidiinta iyo ardayda inta lagu jiro shaqo-joojinta (Supporting parents and students through a strike (Sept. 30, 2025)
- Warbixin ku saabsan wada hadallada macallimiinta: Wasiir Horner (Teacher negotiation update: Minister Horner (Sept. 29, 2025)

**Su'aalaha Saxaafadda / Warbaahinta**


Garrett Koehler
Garrett.koehler@gov.ab.ca
780-554-5777
Xoghayaha Saxaafadda, Wasaaradda Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta